

# Lubion® Progesterone 25mg

xalka la isku duro

Progesterone-ka biyaha leh  
ee loogu talagalay taageerida hormoonka  
uurka xilliga wareega IVF  
Hagaha iska duritaanka maqaarka hoostiisa



# Sidee loo isticmaala Lubion?

Kahor inta aadan qaadan irbadda koowaad, dhaq gacmahaaga oo diyaari sagxad nadiif ah oo aad saarato dhammaan alaabta aad u baahan tahay:-

## Saliingada

Irbadda gaaban oo duritaanka (inta badan jaallaha ama dameeriga ah)

Irbadda lagu soo qaado daawada (inta badan cagaaran ama carwaajiska ah)

Dhalada ay ku jirto Lubion® biyaha daawada lagu qaso

Weelka biraha afaysan



- Isku xir irbadda daawada lagu soo qaado ee weyn iyo saliingaha, adigoo furka ama daboolka ka qaadin irbadda.



- Ka qaad furka caagga ah daboolka ah dhalada daawada Lubion®, adigoo daynaya qaybta goomaha ah ee ku xiran dusha sare dhalada daawada.
- Ka qaad furka ama daboolka irbadda weyn.



- Irbadda ku duleeli goomaha ku xiran dusha sare dhalada, si tartiib ah ugu riix irbadda adoo adeegsanaya salka hoose ee dhalada daawada oo si deggan saliingaha ugu soo qaad xalka oo dhan.
- Ka bixi irbadda oo dib u celi wax yar quusiyaha si aad u hubiso inuusan wax dareere ah ku harin saliingaha.



- Kala bixi irbadda daawada lagu soo qaado iyo saliingaha oo weelka biraha afaysan kula rid dhalada maran ee daawada Lubion®.



- Isku xir irbadda duritaanka ee yar iyo saliingaha, adigoo furka ama daboolka ka qaadin irbadda.



- Kala bixi furka ama daboolka irbadda saaran iyo irbadda duritaanka oo ka fiiri saliingaha inuu leeyahay abur hawo ah.
- Qabo saliingaha adigoo caarada irbadda kor u jeedinaya oo si tartiib ah fartaada ugu garaac saliingaha ilaa aburta oo dhan ay isugu soo uruuraan xagga sare.



- Si tartiib ah u riix quusiyaha saliingaha ilaa aburka oo dhan laga saaro oo gobo' dareere ah ka soo muuqanayso dhammadka irbadda.

## Lubion waxaa looga qaataa irbad ahaan maqaarka hoostiisa, caloosha ama qaybta sare ee bowdada midkood.



- Marka aad ku durayso caloosha, waxaa lagu talinayaan inaad ku durto aag ka hooseeya xudunta.
- Marka daawada la qaadanayo maalin kasta, waxaa lagu talinayaan in la beddelo goobta la iska durayo si aan la isaga durin hal meel.



- Far iyo suul xoog ugu qabo maqaarka oo ku dur irbadda adigoo adeegsanaya xagal 45° ilaa 90° ah.



- Marka aad sii dayso maqaarka aad qabatay, isku dur daawada oo idil adoo si tartiib ah oo joogto ah u riixaya quusiyaha.

Si aad u hesho hagaha muuqaalka ama fiidiyowga ah oo dhammaystiran ee ku saabsan sida loo diyaariyo la iskuna duro daawada Lubion, fadlan iskaan garee koodhka QR ama booqo: [www.ibsapharma.co.uk/products/product/lubion](http://www.ibsapharma.co.uk/products/product/lubion)



## Maxaa la iigu qoray progesterone?

Inta lagu gudajiro qaybta hore ee wareegga caadada ee caadiga ah, ukumaha ayaa diyaar ku dhex noqda goobo loo yaqaano kiishashka, oo ka kooban lakabyo unugyo ah oo soo saara hormoono kuwaasoo ku gadaaman ugxaanta iyo dheecaan hoormoonku ku badan yahay. Xuubabka waxay soo saaraan hormoon loo yaqaano hormoonka dumarka (oestrogen) kaasoo keena kala beekhaanka (kala bixida) nudaha ilmo-galeenka ama daarka makaanka. Dumarku caadi ahaan waxay leeyihin hal xuub oo ugu burji sarreeya, kaasoo dhex bartanka ka kala baxa, oo siidaaya ugxaan. Tani waxaa loo yaqaan ugxaanaynta. Kadib ugxaanaynta, xuubka maran wuu isbeddelaa si uu u noqdo qayb la yiraahdo **corpus luteum**, taasoo soo saarta hormoonka progesterone.

Hormoonka Progesterone ayaa isbeddel ku sameeya nudaha ilmo-galeenka si ay ugu habboonaato aqbalidda iyo nafaqaynta uujiifka. Hormoonka Progesterone wuxuu ilaaliyaa nudaha ilmo-galeenka wuxuuna hubiyaa soo saarista dheeacanada qaarkood ee kahortagaya inuu nudaha makaanka burbuur. Hormoonka Progesterone wuxuu saameeyaa habdhiska difaaca jirka wuxuuna sidaas darteed muhiim u yahay yeelashada uur goor hore iyo sii socoshada uurka.<sup>1,2</sup>

Haddii aad martay daawayn adoo u maraya Assisted Reproductive Technology (ART) (Farsamooyinka Daaweyn ee Taranka) sida bacriminta ka baxsan jirka (in-vitro fertilisation, IVF), Isku Durida Shahwada iyo Ugxaanta (Intra Cytoplasmic Sperm Injection, ICSI) ama kadib marka ukun deeq ah la helo, waa dhaqan caadi ah in la qaato hormoonka progesterone oo dheeraad ah **\*taageerida hormoonka uurka\***. Taageeradani waxay inta badan bilaabataa isla markiiba kadib marka ugxaanta la soo bixiyo waxayna socotaa ilaa jirku uga soo saaro hormoonka progesterone-ka oo ku filan si madax-bannaan oo aan u baahnay taageero dheeraad ah.

### Dhigaalada

- Shah NM, Lai PF, Imami N, Johnson MR. Progesterone-Related Immune Modulation of Pregnancy and Labor. *Front Endocrinol (Lausanne)*. 2019;10:198. Published 2019 Mar 29. doi:10.3389/fendo.2019.00198
- Schumacher A, Costa SD, Zenclussen AC. Endocrine factors modulating immune responses in pregnancy. *Front Immunol*. 2014 May;5:196.

### Dhacdooyinka Xun

Haddii aad isku aragto waxdhimaalo, la hadal dhakhtarkaaga, farmashiistaaga ama kalkalintaada. Tani waxaa ku jira waxdhimaalo kasta oo suurtgal ah oo aan lagu xusin warqadda yar ee ku dhagan xirmada.

Waxaad sidoo kale si toos ah waxdhimaalada adoo u maraya Qorshaha Kaarka Jaallaha ah (Yellow Card Scheme) ku soo sheegi kartaa barta <https://yellowcard.mhra.gov.uk/>.

Markaad soo sheegayso waxdhimaalada waxaad gacan ka geysan kartaa bixinta macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan badqabka daawadan.